



## Xafiiska Gobolka Washington ee Dhegaysiga Maamuleed

Si madaxbanaan ayaanu u xalilnay khilaafyadii maamuleed iyaddoo la marayo habab la heli karo, xaq ah, degdeg ah oo waxaanu soo saarnay go'aano macquul ah.

### Maxaa Dhacaya Markaad Codsato Dhegaysi Taageerada Ilmaha ah

- Koox kastaa waxay codsan kartaa dhegaysi Marka Qaybta Taageerada Ilmaha (DCS) ay iksu daydo in ay dhisto, dhaqan geliso, ama beddesho taageerada ilmaha. Dhagaysiga waxaa qabta garsoore madaxbanaan oon cid u eexan oo jooga Xafiiska Dhegaysiga Maamuleed (OAH).
- OAH waxay boosta kuugi soo diri doontaa Ogaysiiska Dhegaysiga oo leh taariikhda, wakhtiga, iyo goobta ee dhegaysigaaga. Celcelis ahaan, dhegaysigu waxa uu dhammaadaa 60 miridh. (Qorshee ilaa 90 miridh.)

**U sheeg OAH isla markaaba haddii Cinwaankaaga ama telefoonku isbeddelo.**

### Sida loo Diyaariyo Dhagaysiga Taageerada Ilmahaaga

- Waxaad wakiil ka noqon kartaa naftaada ama waxaad dooran kartaa qareen ama qof kale oo kaa wakiil noqda adiga. (Ma dooran kartid Waaxda Bulshadda iyo Adeegyada Caafimaadka (DSHS) shaqaalaha.) Waxaad masuul ka tahay wixii kharash ah ee uu soo dalacdo qareenkaagu.
- DCS waxaa wakiil ka noqon doonaa sarkaalka qareenka cabashooyinka. Sarkaalka cabashooyinku waxa uu boosta kuugu soo diri doonaa xidhmada dhagaysiga taas oo ay ku jirto warqadaha ay bixiyeen kooxahu. Si feejigan u akhri xidhmada dhagaysiga oo hayso adigu wakhiga dhegaysiga.
- Haddii aad hayso warqaddo aad rabto in garsoorahu uu arko, isla maraaba u dir OAH iyo DCS. Haddii warqadduhu ay ka koobanyihiin xog aanad rabin in kooxaha kale ay ogaadaan (cinwaanadda, lambarada telefoonada, Lambarada aminga bulsho, iwm.), tirtir xogta ka hor inta aanad u dirin warqaddaha OAH iyo DCS. Tusaalooyinka warqaddaha aad doonayso in garsoorahu uu arko:
  - Cashuur celinta iyo foomamka W-2
  - Xaashida Diiwaanka Taageerada Ilmaha
  - Amarada maxkamadda saamaynaya ilmahaaga
  - Warqadda lacag bixinta jeegga raacsan, bayaanka dheefaha, ama diiwaanka lacag bixinta naafadda
  - Kharashka caafimaad ama kharashyada caymiska ee ilmaha
  - Caddaynta wax taageero ah oo la bixiyay
- Haddii aad hayso amar xayiraad ah, U sheeg OAH iyo DCS isla markaaba.
- Haddii aad u baahantahay turjubaan, OAH waxay kugu siin doontaa adiga kharash la'aan. Haddii aad naafo tahay waxaad codsan kartaa hoy si ay kaaga caawiso in aad ka qayb gasho dhagaysiga. Waxaad codsan kartaa turjubaan ama hoy adoo wacaya xafiiska OAH sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah.
- Haddii aad u baahanahay in aad codsato beddel wakhtiga ama taariikhda dhegaysigaaga, la xidhiidh xafiiska cabashadda iyo OAH sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah. Garsooraha oo keliya ayaa ku siin kara beddelka wakhtiga dhegaysigaaga jadwalka leh. Go'aanka ka hor, garsoorahu waxa uu dooni doonaa in uu ogaado haddii kooxaha kale ay aqbalaan ama khilaafaan codsigaaga.
  - Garsooruhu wuu diidi karaa codsigaaga haddii aanad haysan sabab wanaagsan.
  - Haddii garsoorahu uu beddelo wakhtiga dhagaysiga. Hayso xidhmada dhagaysiga si aad ugu isticmaasho muddada dib jadwal ugu samaynta dhegaysiga.
  - Haddii wakhti wanaagsan lagu siiyay laakiin aan la dejin taageerada ilmaha. Koox ayaa waydiin karta garsooraha in ay soo saaraan amar taageero ilmaha ah oo ku meel gaadh ah.
- Waxaad waydiin kartaa in la beddelo dhagaysiga shakhsi ahaan garsooraha. Haddii aad doonayso in la beddelo sida dhagaysigaaga loo qabtay waa in aad la xidhiidhaa xafiiska OAH ee ku qoran Ogaysiiska Dhegaysiga.

**Dhagaysigaagu waxa uu ahaan doonaa telefoonka.**

- Haddii aad danaynayso samaynta daraasad sharci ah, linkiyada waxa laga heli karaa [www.oah.wa.gov/LegalResearch.shtml](http://www.oah.wa.gov/LegalResearch.shtml) iyo [www.washingtonlawhelp.org](http://www.washingtonlawhelp.org).

## Ka daawo fiidyowga tusaale dhagaysiga

OAH [www.oah.wa.gov](http://www.oah.wa.gov)

(lagu heli karo Af Ingiriisi io Isbaanish)

- Halkan waxaa ah ikhtiyaarada qiimaha la dhimay ee caawimadda sharci:

Magaca Isha	Lambarka Telefoonka	Barta Internatka
SAAFI: Gudaha Degmadda King SAAFI: Dibadda Degmadda King	Wac 211 888-201-1014	iyo <a href="http://www.resourcehouse.com/win211">www.resourcehouse.com/win211</a> .
Mashruuca Ruugcaddaaga	855-657-8387	iyo <a href="http://nwjustice.org/veterans">http://nwjustice.org/veterans</a> .
Ururka Wakiiladda Qareenada ee WA		<a href="http://www.wsba.org/Resources-and-Services/Find-Legal-Help">http://www.wsba.org/Resources-and-Services/Find-Legal-Help</a>
Adeega Kharash dhimista Gudbinta Qareenada	855-741-6930	<a href="http://www.wsba.org/Legal-Community/Volunteer-Opportunities/Public-Service-Opportunities/Moderate-Means-Program">http://www.wsba.org/Legal-Community/Volunteer-Opportunities/Public-Service-Opportunities/Moderate-Means-Program</a>

**Waxaad la xidhiidhi kartaa sarkaalka cabashada DSC haddii aad jeclaan lahayd in aad dejiso kiis dhagaysiga ka hor, ama aad hayso su'aalo ku saabsan sharciyada. Sarkaalka cabashadu kuma siin karo talo sharci.**

### Sida looga Qayb galo Dhagaysiga Taageerada ilmahaaga

- Raac tilmaamaha ku yaala Ogaysiiska Dhagaysiga. Sarkaalka cabashadu waxa uu ku soo waci doonaa adiga taariikhda iyo wakhtiga dhegaysiga. Haddii aad ka jawaabi waydo oo ka qayb geli waydo, waxaad lumin doontaa xaqaaqa dhegaysiga. Dhagaysigu wuu sii socon karaa adiga la'aanta.
  - Ogaysiisku waxa uu ku fari doonaa in aad bixiso telefoon lambarka halka lagaala soo xidhiidhi karo.
  - Waa in aad leedahay maqal telefoon oo wanaagsan.
  - Fadlan ogow waa in aad awood u yeelaataa in aad wicitaanada ka maqasho telefoonka ka xidhan araga lambarka ku soo waca.
- Sarkaalka cabashadu waxa uu la hadli karaa kooxaha si uu u xaliyo arrimaha.
  - Haddii kooxahu ay heshiis galaan, sarkaalka cabashadu waxa uu soo waci doonaa oo uu waydiin doonaa garsooraha in uu ogolaado heshiiska.
  - Haddii kooxahu aanay heshiis gaadhin, sarkaalka cabashadu waxa uu waci doonaa oo u sheegi garsooraha in kooxahu ay diyaar u yihiin in ay bilaabaan dhegaysiga.
    - Qadarka lagala hadlay sarkaalka cabashada way ka duwanaan karaan qadarka garsoorahu amro marka uu go'aaminayo kiiska.
- Haddii aad qorshaynaso isticmaalka markhaati, waxay caddayn bixin doonaan muddada wakhtiga dhegaysigaaga jadwalka leh. Hayso lambarada halka markhaatigaaga lagala xidhiidhaya. U sheeg markhaatiga wakhtiga iyo taariikhda dhagaysiga iyo sida looga qayb galayo. U sheeg markhaatiga telefoonkoodu in uu leeyahay maqal wanaagsan oo telefoonkooda wax laga maqli karo telefoonka ka xidhan araga lambarka ku soo waca.
- Garsoorahu waxa uu duubi doonaa dhegaysiga. Garsoorahu waxa uu bilaabi doonaa la aqoonsashada arrimaha kooxaha iyo faahfaahinta waxa dhici doonaa muddada dhegaysiga. Garsoorahu waxa uu dib u eegi doonaa xidhmada dhegaysiga (iyo warqaddaha kale ee la helay) oo waxa uu go'aamin doonaa waxa loo ogolaanayo caddaynta.
- Sarkaalka cabashadu caaddi ahaan waxa uu soo gudbiyaa kiiska DCS ugu horaynta. Koox kastaa waxay waci kartaa markhaatigooda oo waxay su'aali markhaatiga ay waceen kooxaha kale. Markhaatigu waxa uu ku marag furaa dhaar ama bayaan. Garsoorahu sidoo kale waxa uu waydiin karaa su'aalo.
- Dhegaysiga ka dib garsoorahu waxa uu gaadhi doonaa go'aan boostada laguugu soo diri doono adiga ugu dhowaan 21 maalmod ka dib xidhista diiwaanka dhegaysiga.
- Haddii aad go'aanka khilaafto, tilmaamaha rafcaan qaadashada go'aanka waxay ahaan doonaan dhammaadka amarka garsooraha.